

# LATCHKEY REGISTRATION

(DIIWAAN-GELINTA DARYEELKA ILMAHA DUGSIGA KA HOR IYO KA DIB)

Sannad–Dugsiyeedka 2025–2026



**COLUMBUS**  
CITY SCHOOLS

**Barnaamijka**  
**Latchkey**

3700 S. High Street  
Columbus, OH 43207  
**614-365-5891**

## TAARIKHAHA & WAQTIYADA RDIWAAN-GELINTA

**Isniin, 12-ka Maajo -ilaa Jimce, 16-ka Maajo** ee loogu talagalay ardayda

Hadda ku jirta Barnaamijka Latchkey.

**Isniin, 19-ka Maajo** (laga bilaabo 7-da a.m., subaxnimo) ee loogu talagalay ardayda iska diiwaan-gelinaysay Barnaamijka Latchkey markii UGU HORREYSEY.

## QIIMAHA DIIWAAN-GELINTA

**\$30.00** halkii cunug

**\$40.00** laba carruur ah ama ka badan oo isku guri ah

## QIIMAHA TODDOBAADKII

**WAQTI BAR AH:** AM oo kaliya: **\$70.00** PM kaliya: **\$75.00**

**WAQTI BUUXA:** Subax & galab: **\$90.00**

\* Khidmadaha waxaa la sugayaa Ansixinta Guddiga Dugsiyada Magaalada Columbus

**Daryeelka ilmaha ee ay dawladdu bixiso waa la ogolaanayaa**

(Waa inaad la kulantaa shaqaalaha kiiskaaga si aad u hesho Ogeysiiska Daryeelka Ilmaha.)

## FAAHFAAHINTA DIIWAAN-GELINTA

Diiwaan-gelintu waxay ka dhacdaa onlaynka, oo ku taal bogga Latchkey ee Dugsiyada Magaalada Columbus. Boosaska Latchkey waxaa lagu buuxiyaa kan ugu hor-yimaada, ayaa loogu hor-adeegayaa. Fadlan la xiriir macalinka Latchkey ee dugsiya uu dhigto ardaygaaga wixii su'aalo ah.

**FIIRO GAAR AH:** Gaadiidka CCS waxaa laga yaabaa inuu bixiyo wadooyinka baska haddii dugsiya hoose ee uu dhigto ardaygaaga aanu ku jirin barnaamijka Latchkey.

Kharashka diiwaan-gelinta waxaa lagu bixin karaa onlaynka iyada oo la adeegsanayo isku xirka lacag bixinta ee websaydka CCS laga bilaabo **18-ka Agoosto, 2025**. Jeega ama lacag-bixinta (money order) waa in lagu bixiyaa Xarunta Waxbarashada Columbus. (270 E. State St., Columbus, OH, waxay furmaysaa 8 a.m., subaxnimo - ilaa 4 p.m., galabnimo. Waxay xirmaysaa 12-ilaa 12:30 duhurnimo ee qadada) Dhammaan lacagaha la bixiyo waa in la helaa ka hor maalinta ugu horreysa ee imaanshaha.

